

Somali

Ha ahaato Willow Brook meel aan qashin lahayn

Baro Willow Brook-ta Leicester iyo
sida aynu dhamaanteen
caawimaad uga geysan karno
dhawristeeda



Canal &
River Trust




Environment
Agency



Leicester
City Council

Ma taqaan Willow Brook?



- Willow Brook waxay magaalada kaga taal dhinaca waqooyi-bari iyadoo ka bilaabanta Spinney Hills oo ku dhamaata Belgrave. Dhererkiisu wuxuu kor u dhaafayaa hal mayl wuxuuna kaga darmaa kanaalka Grand Union Beerta Abbey.
- Waddooyinka Leicester badankood waxay dhinac maraan Willow Brook. Brook wuxuu ag maraa guryaha iyo meheradaha ganacsiga. Waxay noqon kartaa inuu kuu maro jardiinadaada dambe meesha ay ku egtahay ama meel ku dhow dhismaha aad ku ganacsatid.
- Willow Brook intiisa badan waa kanaal shub ah laakiin ma jiraan biyo af-banaan oo magaalada dhex mara oo ah biyo bajaroor ama bullaacad.



Maxaa keenay in banaanka qashin ku daadintu dhibaato noqoto?

Badanaa qashin baa ku daadsan banaanka brook. Qashinka banaanka daadsani wuxuu ka hor-istaagayaa in bay'addeenu ahaato mid nadiif ah, amaan ah oo caafimaad qabta. Qashinku markuu ku bato brook wuxuu sababi karaa in biyo mareenadii xirmaan oo khatarta fatahaadaha ee guryaha iyo goobaha ganacsigu kororto. Willow Brook wuxuu ku dhacaa biyo mareeno kale, sidaa daraadeed wixii qashin ah oo la socda waxay hallayn karaan kanaaladeena biyaha, wabiyadeena iyo ugu dambayn badaheenna.

- Qashinka ugu badan ee lagu arkay isagoo daadsan banaanka Willow Brook noocyadiisu waxay kala yihiin caagag, biro, boloyestiriin (xorboboshka alaabta xagatinta lagaga ilaaliyo), alaabta ka samaysan wax la miiqay (dun ama wax kale), shaagag, alaab loox ka samaysan.
- Qashinka daadsan brook waa mid ka yimid guryaha iyo ganacsigaba.
- Qashinka meeshii la arko la isaga qubo wuxuu qayb ka yahay qashinka daadsan banaanka Willow Brook. Qashin isaga daadinta meeshii aad aragtid waxaa weeye adigoo qashinkii isaga quba dhul dadweynaha ka dhexeeya ama gaar loo leeyahay. Inaad sidaa yeesho waa dembi waana lagu ganaaxi karaa.
- Qashin banaanka ku daadintu wuxuu saameeyaa duur-joogta sida shimbiraha iyo xayawaanka yar-yar. Wuxuu wasakheeyaa bay'ada dabiiciga ah iyo duur-joogta ku nool.



Waa mas'uuliyad saaran dhamaan dadka deggan iyo ganacsatadu inay ka ilaaliyaan brooks-keenna qashin-qub iyo qashin banaanka daadsan.

Qashinkaaga guriga u qaado



Isticmaal goobaha wax dib-u-warshadaynta



Soo sheeg qashinka banaanka daadsan, qashin qubka ama wasakh biyaha ku dhex-jirta



Kaamerooyin lagu ilaaliyo baa hadda lagu xirayaa Willow Brook oo caawinaya in la qabto oo la ganaaxo dadka qashinka ku quba iyo kuwa wasakheeya.

NAGU CAAWI

- ✓ Joogtaynta bay'ad amaan ah, nadiif ah oo caafimaad qabta
- ✓ Yaraynta daadadka
- ✓ Ilaalinta noocyada nafleyda biyo ku noolka ah sida shimbiraha (swan-ka, ducks-ka iyo heron-ka) iyo bahalka vole-ka biyaha

JOOJINTA

- ✗ Dhinac u turka haamaha qashinka
- ✗ Qashin bannaan ku qubista (Mid guri iyo mid warshadeedba)
- ✗ Sababidda in hawadu xumaato
- ✗ Sababidda in dhuumaha brook xirmaan

Si sax ah qashinkaaga isaga qaad

Isticmaal adeegga qashin-qaadka guryaha iyo qashin dib-u-warshadeynta

leicester.gov.uk/waste

Ka ballanso in bilaash lagaaga qaado alaabta waaweyn

my.leicester.gov.uk

Macluumaadka dib wax-u-warshadeynta

leicester.gov.uk/recycling

 [@orangebagleics](https://twitter.com/orangebagleics)

Adeegga qashin-qaadka ganacsiga

leicester.gov.uk/tradewaste

Soo sheegidda qashin-qubka iyo qashin banaanada daadsan



my.leicester.gov.uk



0116 454 1001



city.warden@leicester.gov.uk



[@citywardens](https://twitter.com/citywardens)



Jacaylka waddooyin nadiif ah waxaad ka qaadi kartaa sawirro qashinka bannaanada daadsan, qashin-qubka ama derbiyada oo lagu feegaaray oo waxaad ku soo sheegi kartaa Abka Jacaylka Waddooyin Nadiif ah adigoo gelaya:
love.leicester.gov.uk

Soo sheegidda qashin-qubka biyo mareenada

Kooxda daadadka iyo bullaacadaha:
flooding@leicester.gov.uk
0116 454 1001

Soo sheegidda wasakhda biyaha dhexdooda

gov.uk/report-an-environmental-incident
0800 80 70 60 (24-hour service)

Samee hal shay oo yar

Haddii mar kasta oo aynu booqano webi ama kanaal ka qaadno hal shay oo caag ah, sanad gudihi wax caag ah kuma haren. Ku soo biir Canal & River Trust
[Canal & River Trust](https://www.canalrivertrust.org.uk)
[#PlasticChallenge](https://www.canalrivertrust.org.uk/plasticchallenge)